Ururka Dhibanayaasha Deegaanka Soomaalida
Association for Somali Region Victims and Survivors (ASVS)

# Bayaxow:

## Aafadii Jeel Ogaden Kadib



Sept
2021

# Nuxurka qoraalka oo kooban

Ururka Dhibanayaasha Deegaanka Soomaalida (ASVS)[1] waa urur ay deegaanka ka aas-aaseen maxaabiistii hore ee Jeel Ogaden iyo Bayaxow bishii 4aad 2019, oo ay ka mid yihiin dhibanayaashii ka soo badbaaday xad-gudubyadii qaawanaa ee ka dhanka ahaa xuquuqul insaanka ee ka dhacay Deegaanka Soomaalida. Ururku wuxuu si gaar ah ugu ol-oleeyaa baahiyaadka iyo xuquuqda dhibanayaashii soo badbaaday, dhinaca dib-udajinta iyo baxnaanada, fayo-qabka jidh ahaan, nafsad ahaan, iyo ka qayb qaadashada cadaalad iyo nabad waarta ka hirgasha gudaha Deegaanka Soomaalida.

Xabsiga dhexe ee Jigjiga sidoo kalana loo yaqaano "Jeel Ogaadeen" wuxuu ku yaalaa magaalada Jigjiga "magaala madaxda Deegaanka Soomaalida". Markii ugu horaysay waxaa la dhisay 2001, waxaa la balaadhiyey 2011, wuxuuna noqday xabsigii ugu waynaa deegaanka kaas oo qaadi karay kumanaan maxaabiis ah laga soo bilaabo 2011[2]. Xabsigii xumaa wuxuu caan ku ahaa xadgudub qaawan oo ka dhan ah xuquuqda aadamaha, oo ay ka mid-yihiin, xabsi aan xukun lahayn, jidh dil, kufsi iyo xadgudubyo kale oo aad u daran. Xaaladii daraydd ee Jeel Ogaadeen waxay qayb ka ahayd dagaalkii ay dawlada Itoobiya kula jirtay ururka ONLF, iyo siyaasadii ku qotontay ciqaab wadareedkii cid kasta oo looga shakiyo in ay taagerto ONLF. Bishii 2aad 2018-kii, Cabdi Maxamuud Cumar "Cabdi Iley" ayaa in kabadan 800 oo maxaabiistii ONLF ka mid ah ka qaaday Jeel Ogaadeen geeyayna Bayaxow si ay marxalad aad u qalafsan ugu sii wataan xabsigoodii. Waxaa maxaabiista lagu qasbay in ay qabtaan shaqooyin dhisma ah oo ka baxsan awoodooda iyagoo loo balan qaaday in la siin doono abaal marino sida xoolo nool iyo dhul beereeed, hase yeeshee majiro maxbuus helay haba yaraatee xuquuqihii loo balan qaaday. Bayaxow wuxuu ahaa mid loogu wakhti dheereeyey Jeel Ogaadeen ilaa lagasoo gaadhay dhicitaaankii dawladii Abdi iley ee bishii 8-aad 2018-kii.

Jeel Ogaadeen waxaa si rasmi ah loo xidhay bishii 9aad 2018[3], taas oo qayb ka ahayd isbadalkii uu la yimid madaxwaynaha Dawlada Deegaanka, mudane - Mustafe Mohomed Omar. Ilaa hadana haba yaraatee lagulama xisaabtamin haayadaha kala duwan ee dawlada Itoobiya xasuuqyadii baaxada laha ee ay ka gaysteen deegaanka Somaalida tobanaankii sano ee lasoo dhaafay, mana jirto isku dayo muujinaya in diyaar loo yahay. 2019kii, madaxweynihii hore ee Deegaanka Soomaalida Cabdi Iley ayaa lagu eedeeyey kicin isku dhacyo qoomiyadeed taas oo lagu salaynayo dhacdadii bishii 8-aad 4-dii, 2018[4]. Dacwadii lagu soo oogay Cabdi Iley waxaa lagu soo koobay dhacdadii 4-tii bishii 8-aad,



1. https://www.as-vs.org/
2. https://www.hrw.org/report/2018/07/04/we-are-dead/torture-and-other-human-rights-abuses-jail-ogaden-somali-regional#_ftn70
3. https://www.africanews.com/2018/09/22/ethiopia-s-somali-region-closes-notorious-jail-ogaden/
4. https://addisstandard.com/news-ethiopia-charges-ex-somali-region-president-46-others-with-inciting-violence/

iyada oo aan laba soo hadal qaadin rabshadihii tobanaanka sannadood socday ee uu hurinayay, waxayna cadayn u tahay sida ay dawlada Itoobiya ugu guul daraysatay ln lala xisaabtamo danbiilayaashii gaystay xad-gudubyada.

Taasi waxay keentay in uu sii balaadho walaaci ay ka qabeen dhibanayaashu, iyo bulsha weyntuba, in cadaalada loo horkeeni waayo xasuuqyadii baahsanaa ee ay gaysteen haayadaha deegaanka iyo kuwa dawlada dhexeba, gaar ahaan mudadii Cabdi Iley ahaa hogaanka nabad galyada deegaanka (2008-2010) iyo markuu ahaa madaxweynaha deeganka Somaalida (2010-2018). Mukhtaar Suubane (lataliyihii Cabdi Iley ee dhinaca amniga soona ahaan jiray madaxa sirdoonka Deegaanka) kaas oo si weyn ugu suntan xadgudubyadii maxaabiista loogu gaystay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow, ayaa hada sababo aan cadeyn loogu hayaa xabsi dawlada dhexe.

Inkastoo xadhigii Bayaxow uu ahaa Jeel Ogaadeen oo halkiisii ka sii socday dhinaca dhacdooyinka, Bayaxow waxaa jira waxyeelooyin dhaqaale iyo amni oo u baahan in feejignaan dheeri ah lasiiyo. Iyada oo la raacayo ol-olihii ururka ASVS ee ahaa in Dawlada Deegaanka Somaalidu ay u magdhawdo maxaabiistii Bayaxow hantidii loo qoondeeyay horantii markii lakeenayay xerada Baxayow, Wasaarada ka Hortaga iyo u Diyaargarow Masiibooyinka ee Deegaanka (DPPB) hadana layidhaahdo wasaarada Maaraynta Musiibooyinka iyo Khataraha (DRMB) waxay soo jeediyeen habraac dib udajin oo maxaabiistii Bayaxow magdhaw lagu siinayo iyada oo lagu salaynayo,1. Shaqo maalmeedkodii, 2. Xoolo nool, 3. Dhul beereed iyo 4. Qiimaha guryihii qasabka ay ku dhiseen[5]. Qorshaha dibu-dajintu waxay ahayd in loogu xisaabtamo si buuxda miisaaniyadii asalka ahayd ee ay u qoondeeyeen mashruucii Bayaxow dhamaan haayadihii ku hawlanaa hindisaha jajabinta miisaaniyada. Qorshahan u jeedkiisu ma ahayn mid loogu magdhabayo kuwii soo badbaaday dhibaatooyinkii balaadhnaa ee jidh ahaan, maskixiyan iyo saamayntii dhaqan dhaqaale ee soo gaadhay maxaabiistii Bayaxow noloshooda. Sida oo kale ASVS waxay codsanaysaa baxnaanin iyo magdhaw dhamaystiran oo ka turjubaya dhaawacyada shaqsiyadeed ee qof walba soo gaadhay, oo ay ku jiraan dhaawacyadii j idh ahaaneed iyo maskax ahaaneed ee soo gaadhay maxaabistii hore, iyo sidoo kale xanunkii, rafaadkii iyo waayitaankii wanaga nololeed.

Sikastaba ha ahaatee, inkastoo kooxihii soo badbaaday cadaadis-koodu soo noqnoqday, ma jiraan wax talaabooyin ah oo ay dawladu qaaday si qorshahan loogu heshiiyo. Maxaabiistii hore ee Bayaxow waxay hada ku firidhsanyihiin Deegaanka Somaalida qeybihiisa kala duwan, iyada oo mid kasta la hardamayo dhibaatada shaqsi ahaaneed iyo wadareed ee cawaaqibta ka dhalatay xadhigii Jeel - Ogaadeen iyo Bayaxow. Kooxda waxaa si rasmi ah ugu matala dhammaan hawlaha la xidhiidha u doodista xuquuqaha ururka ASVS.



5 Amnidarada Bayaxow waxaa sababay cunsurka qabaa'ilada kala duwan ee isku haysta lahaanshaha dhuleed ee aaga Bayaxow, iyo dib u dajinta barakacayaasha ee ay dawladu u qorshaysay dhulkan loo tartamayo taas oo ay 2020-kii ka dheceen rabshado.

## Talooyin

### Ku socota Dawlada Deegaanka Somaalida:

In sida ugu dhakhsaha badan loo diro koomishinka 'Xaqiijin iyo Xaalmarin' baadhitaan madax-banaan oo ku saabsan aas-aaskii Bayaxow.

Baadhitaanku waa in uu daboolaa dhamaan eedaymaha laxidhiidha jidh dilka iyo dhamaan nooc kasta oo xadgudub ah, iyo in la baadho haayadihii iyo shaqsiyaadkii ku lug lahaa aafadii Bayaxow, iyada oo lagu darayo suurtagal-nimada ku lug lahaanshaha hay'ado caalami ah iyo dhaqaale caalami ah mashruucii Bayaxow. Baadhitaanka lagu samaynayo Bayaxow waa in lagu daraa eedaymaha musuq-maasuq ee loo hayo shaqsiyadka iyo haayadaha ku lug lahaa miirashadii dhiiga maxaabiistii hore si ay uga faa'iidaan macaash ganacsi.

- In la hubiyo in maxaabiistii Bayaxow loo aqoonsado qayb ka mid ah maxaabiistii Jeel Ogaadeen iyadoo muhiimad gaar ah lasiinayo.
- In Bayaxow loo aqoonsado Jeel Ogaadeen oo la badiyey, iyo in la aqoonsado baaxada iyo hababkii kala gadisnaa ee xabsiyayntii ka dhacday deegaanka soomaalida iyo dhacdooyinkii lahaa jidh dilka iyo ku tumashada xuquuqaha.

In wasaarada Xalinta Masiibooyinka iyo Khataraha iyo haayadaha dawliga ah ee loo idmaday ka shaqaynta arimahan ay dib u eegaan balaadhiyaana qorshihii magdhaw ee la diyariyey iyaga oo raacaya miisaaniyadii ay dawladu uqabatay in magdhaw lagu siiyo maxaabiistii hore. 1.Shaqadii maalinlaha ahayd, 2. Xoolo nool, 3. dhul beereed, 4. Qiimaha guryihii ay dhiseen.

Qorshaha balaadhinta waa in ay ka mid noqdaan istaraatijiyado cusub oo lagu hormarinayo fayo-qabka jidheed iyo maskaxeed ee maxaabiistii hore ee Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow.

In la daaweeyo saamaynta jidheed, maskaxeed iyo dhaqan dhaqaale ee noloshooda, qorshaha magdhawga iyo xanaanayntu waa inuu dhaqaaleeyaa maxaabiistii soo bad baaday fursadna usiiyaa inay helaan adeegyo ay ka midyihiin balse aan ku xadidnayn lacago la siiyo iyo u suuragalinta dhakhtarada lagana taageero caafimaadka maskaxeed. Sababaha loo hormarinayo qorshaha magdhawga waa inuu noqdaa mid lagu xaqiijinayo dhibanayaashu siday dib ugusoo noqon lahaayeen jidh ahaan, dhaqaale ahaan iyo maskax ahaanba xaaladii ay kunjireen Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow ka hor.

- In la dhaqan galiyo baaqyadii hore ee ahaa in xusuus laga reebo goobihii jidh dilka iyo xad gudubyada daran ka dheceen, sida Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow iyadoo lagala tashanayo kooxaha kasoo bad baaday. Arintani waxay kordhinaysaa caafimaadka bulsho, waxayna sare u qaadaysaa baraaruga jiilasha mustaqbalka.
- In maxaabiistii hore ee Jeel Ogaadeen kuwa doonaya in ay sii wataan waxbarashadooda loo sameeyo sanduuq deeq wabarasho si ay noloshoodu u taaba gasho.
- In kor loo qaado dhamaan dadaalada maxaliga ah ee ladoonayo in wax looga qabto dhamaan xadgudubyadii ka dhan ka ahaa xuquuqda bini-aadamka ee kadhacay Deegaanka Somaalida, iyadoo si buuxda loo taageerayo koomishinka 'Xaqiijin iyo Xaalmarin' ee dhawaan la dhisay.

## Kusocota Dawlada Dhexe ee Itoobiya:

- Maadaama oo Dawlada Dhexe ee Itoobiya iyo Dawlada Deegaanka Somaalidu si buuxda oo wada jira masuul uga ahaayeen xadhigii baahsanaa iyo sidii dhaqanka ka baxsanayd ee loola dhaqmay maxaabiistii Deegaanka Somaalida, waxaa loogu baaqayaa in ay magdhaw ka bixiyaan dhaawacyadii kasoo gaadhay maxaabista Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow, oo ay ku jiraan dhaawac-yadii jidh ahaaneed iyo maskax ahaaneed ee soo gaadhay maxaabista, iyo sidoo kale xanunkii, rafaadkii iyo waayitaanka wanaga nololeed.
- In baadhitaan madax-banaan oo daah-furan lagu sameeyo dhamaan eedaymaha la xidhiidha jidh dilka iyo xad-gudubyada kale ee halista ah ee ka dhacay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow.

## Ku socota Dawlada Dhexe ee Itoobiya Iyo Dawlada Deegaanka Somaalida:

- In la baadho lana ogaado dhamaan shaqsiyaadka ku lug lahaa ciqaabtii iyo xad-gudubyadii halista ahaa ee ka dhacay Jeel Ogaadeen.
- In danbiilayaashii xad-gudubyada u gaystay maxaabiistii Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow cadaalada la horkeeno.
- In la hindiso istaraatijiyad wax looga qabanayo dhibaatooyinka suura galin kara ciqaabta iyo xad-gudubyada ka dhanka ah xuquuqul insaanka, sida in isbadal lagu sameeyo waaxda cadaalada iyo in dib u habayn lagu sameeyo qaab dhismeedka hay'adaha amniga ee deegaanka gaar ahaan waaxyihii ka qayb qaatay cabudhinta kuwaas oo aan damaanad qaadi karin inayna soo noqonaynin xad-gudubyadii xad dhaafka ahaa ee dhacay.

### Ku socota Saaxiibada Caalamiga ah:

- In sida ugu macquulsan loo baadho dambiyadii ka dhanka ahaa xuquuqul insaanka ee ka dhacay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow.
- In dhanka farsamada iyo qalabka laga caawiyo dadaalada ay maxaabiistii soo bad-baaday ugu jiraan sidii ay isdhexgal iyo dibu dajinba uga heli lahaayeen Deegaanka Soomaalida.
- In hay'adaha caalimiga ah ee Deegaanka Soomaalida kala shaqeeya arimaha barakacayaasha, gaar ahaan hindisaha dibu dajinta Bayaxow ay gacan ka gaystaan, si loo gaadho qorshe dib u dajineed oo dhamaystiran oo ay ka wa

## Sooyaalka Taariikheed

Deegaanka Soomaalidu waa hoyga qiyaastii 6 malyuun[6] oo isirkoodu soomaali yahay ay ku nool yihiin, wuxuu ka mid yahay 10 ka ismaamul ee dalka Itoobiya wuuxuna xad la wadaagaa Oromiya dhanka galbeedka iyo koonfur galbeed, Canfar galbeed iyo waqooyi galbeed, Soomaaliya bari, koonfur bari iyo waqooyi bari, Kenya dhinaca koonfurta iyo Djabuuti oo dhanka waqooyi-bari ay xad kala wadaagto.

Ilaa xiligii uu Menelik duulaanka kusoo qaaday dhulka Soomaalida aakhirkii 1800, xidhiidh xumadii ka dhexaysay dadka Soomaalida ah iyo xukuumadihii talada hayey waxaa cadaynayey rabshadihii iyo iska caabintii ay sameeyeen Soomaalidu. Weeraradii ka dhanka ahaa xoolaha nool ee bulshada reer guuraaga ah (noloshooda aas-aasiga ah), xakaw gooyadii baahsanayd iyo magaalooyinkii ay gabi ahaanba burburiyeen ciidamadii Ras Mokonnen waxaa ka dhashay halgankii uu hogaaminayey Sayid Maxamed Cabdille Xassan oo ku beegnaa qarnigii 20aad. Intii lagujiray mudadaas, Sayidku wuxuu dhisay ciidan Soomaaliyeed oo iska caabiyey guumaysta yaashii Ingiriiska, Itoobiya iyo Talyaaniga. Kadib waxaa bilawday abaabulkii siyaasadeed ee dhalinyaradii xornimo doonka soomaaliyeed (SYL) sanadihii 1940 meeyadii iyagoo dalbanayey in afti laga qaado dadka Soomaaliyeed waxayna arkayeen inay dabayl xornimo ka bilaabatay qaarada Afrika. Sheegashadii Itoobiya ee dhulka Soomaalida waxaa la ogaaday sannadkii 1948 markii ay maamulkii ciidamada mulatariga ee Ingiriisku ku wareejiyeen dhulka Ogaden iyo sannadkii 1955 wareejintii Hawd iyo Reserve areas. Dhulkii Soomaalida ee nidaamkii Itoobiya lagu wareejiyey wuxuu furay abaabul cusub oo siyaasadeed kaasoo lagaga soo horjeedo xukunka Itoobiya, dhaq-dhaqaaqaas oo magiciisu ahaa "Nasruallah" waxaana hogaaminayey Garaad Makhtal Daahir oo bilaabay mucaarad hubaysan oo la dagaalamay dawladii Itoobiya sannad kii 1963. Waxaa xigay Jabhadii Xoraynta Soomaali Galbeed (WSLF) si dhulka Ogaden looga gooyo dalka Itoobiya kaas oo caan ku noqday dagaalkii Ogaden ee 1977dii.



6 Tiradani waa mid ku salaysan qiyaasta deegaanka maadaama oo aan la haynin mid rasmi ah. Sababo la xidhiidha tira koobyadii hore oo la siyaasadeeyey

Jabhada Wadaniga Xoraynta Ogaadeeniya (JWXO) waxaa la aas-aasay sannadkii 1984 waxaana loo aas-aasay raadinta madax-banaanida deegaanka Somaalida (Ogaden) ee ku hoos jira xukunka dawlada Itoobiya. Markii ay dhacday dawladii Dhargigii taladana ay la wareegtay EPRDF, JWXO waxay ka qaadatay door muhiim ah dib u dhiskii dawladnimada Itoobiya, kaas oo qoomiyadaha kala duwan u damaanad qaadaya heer madax-banaani iyadoo laraacayo dastuurka fadaraalka ee ku dhisan nidaamka qawmiga ah. JWXO waxay door muuqda ka qaadatay siyaasada deegaanka iyadoo u tartantay doorashii 1993kii, waxayna ku guulaysatay 60% kuraasta baarlamaanka deegaanka.

Bishii Febraayo sannadii 1994, JWXO waxay baarlamaankii deegaanka u gudbisay inay ansixiyaan afti dad wayne iyagoo adeegsanaya qodobka 39aad ee tastuurka Itoobiya kaas oo u ogolaanayey gu'itaan buuxa. Arintaasi waxay keentay inay dawlaadu Itoobiya weerar ku qaado madaxdii sare ee ONLF, oo uu kamid ahaa xidh-xidhkii madax waynihii iyo golihiisii wasiirada. Bishii 4aad 1994, JWXO waxay banaysay dhamaan xafiisyadii dawlada waxayna bilawday dagaal hubaysan oo kadhan ah dawlada Itoobiya. Iyagoo sameeyey abaabulkii ugu dambeeyey oo ay ku muujinayeen gooni isutaagii ay soomaalidu mudada dheer dalbanaysay.

Soo noqnoqoshada isku dhacyada kala duwan waxay ahaayeen joogto waxayna isu badaleen dagaalo dabadheeraaday kuwaas oo ka dhigay Deegaanka Soomaalidu inuu noqdo goob ay gees ka gees jiilashu isu gudbiyaan cadaawad iyo dhibaatooyin ka dhan ah bini aadamnimada.

Inkastoo isbadaladii siyaasadeed ee marar badan soo maray Itoobiya, ay soomaalidu isku dayday inay dawlada dhexe islameel dhigaan qorshe siyaasaded tusaale, xukuumadii boqortooyadii Dhargiga iyo xukuumadii EPRDF balse waxay ku suntanaayeen dhisida dawlado aan loo sinayn. Soomalida ku hoos nool Itoobiya waxay ka mid tahay kuwa sida xun loo takooray siyaasad ahaan, bulsho ahaan, dhaqan ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Matalaada ay Soomaalidu ku leedahay siyaasada iyo hay'adaha amniga Itoobiya waa wax aad u hooseeya tiro ahaan iyo tayo ahaanba isla markaana Deegaanka Soomaalidu gabi ahaanba way dib dhacsan yihiin kaabayaashiisa horumarineed sida gaadiidka, isgaadhsiinta, caafimaadka, biyaha iyo adeega kale ee aas-aasiga ah. Tirada dadka ay soo wajahdo cunto la'aantu[7] ee Deegaanka Soomaalida aad ayey uga badantahay marka la barbar dhigo deegaanada kale.



7. https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/IPC_Ethiopia_Acute_Food_Insecurity_2020Oct2021Sept_Report.pdf .

# Xad gudubyada xuquuqul insaanka

Markii uu bilawday dagaalkii hubaysnaa ee ONLF, waxaa Deegaanka Soomaalidda laga diiwaan galiyey xad gudubyo baahsan[8] oo ka dhan ah xuquuqul insaanka oo ay ku keceen saraaakiishii amnigu, gaar ahaan adeegsiga jidh dilka oo ay fulinayeen ciidamada amniga iyo laamaha sirdoonka Itoobiya ee ka amar qaadanayey taliskii EPRDF ee ay hogaaminaysay TPLF iyagoo kula dagaalamayey ONLF una isticmaalayey awood si ay u hor istaagaan taageerayaasha ONLF.

Colaada deegaanka Somaalidu waxay yeelatay waji cusub kadib markii JWXO weerartay shirkad shiine (china) laga leeyay oo shidaal qodis ka samaynaysay tuulada Cobale oo ka tirsan dagmada Dhagaxbuur ee gobalka Jarar, bishii 4aad sannadkii 2007dii, halkaas oo ay ku dileen ku dhawaad 70 ruux oo ay ku jiraan shiinays (chinees), shacab Itoobiyaan ah iyo ciidamo ka mid ah mulatariga Itoobiya. Ra'isal wasaare Melez Zanawi wuxuu bilaabay weeraro arxan daro ah oo lagaga hortagayo dhaqdhaqaaqa JWXO kaas oo ay hogaaminayeen ciidamada difaaca qaranka Itoobiya kuwaas oo dusha ka saaray bulshada rayadka ah dhamaan dhaqdhaqaaqyadii Jabhada. Sida ay ku tilmaantay hay'ada u dooda xuquuqda aadama (Human Rights Watch) 'ciqaab wadareed' ciidanka difaaca Itoobiya waxay sameeyeen falal ciqaabeed baahsan, dilal sharciga baal marsan, xadhig baahsan, kufsi, dhac, tuulooyin la dumiyey ama la gubay, cuno qabatayn iyo xad-gudubyo kale oo halis ah. Hay'ada u dooda xuquuqul insaanku (Human Rights Watch) waxay kusoo gunaanaday in ay cidamada difaaca Itoobiya ka masuul yihin dhamaan danbiyadii ka dhanka ahaa aadamaha ee ka dhacay Deegaanka Somaalida[9]. 2007dii waxay ku suntantahay xiligii warbaahinta madaxa banan ee maxaliga ah iyo kuwa caalimaga ah, ururada bulshada, deeqbixiyayasha iyo haayadaha gargarka bixiyaba dhamaantood laga mamnuucay dalka.

Sannadkii 2009-kii ciidamo arxan laawayaal ah oo si gaar ah u taba-baran si toos ahna uga amar qaata madaxwaynaha Deegaanka Soomaalida ayaa lagu xoojiyey ciidamadii difaaca Itoobiya si ay usii wadaan dagaal ka dhan ah ururka ONLF iyo dhamaanba shacabka Soomaalida. Ciidamada liyu booliiska ayaa si ula kac ah bulshada rayadka ah ku qaaday weeraro joogta ah, si ay xididada ugu siibaan kacdoonka isla markaana u argagax galiyaan shacabka iyaga oo ka hortagaya xidhiidh dhex mara shacabka iyo ONLF, oo la mid ahayd 4 urur oo ay dawlada Itoobiya u aqoonsatay argagixiso, sida Al-shabaab, AL-qaacida, Ginbot 7 (G7) iyo Jabhada Xoraynta Oromada (OLF).

Xidh-xidh baahsan oo lagu beegsanayey xubnaha ONLF iyo dadka rayadka ah oo looga shakiyey inay taageeraan ururka ONLF iyo ururo kale oo kasoo horjeeday xukuumada ayuu ahaa halbeega lagu saleeyo istaraatijiyada dawlada Itoobiya kula dagaalamaysay Jabhadihii hubaysnaa.Arintan waxaa fududeeyey ciidamada liyuu



8 Itoobiya waxay ka mid tahay heshiiska lagaga soo horjeedo ciqaabta (Convention against Torture) taas oo u qeexaysa ciqaabta "ficil kasta oo keenaya xanuun daran, hadii uu yahay mid jidheed ama mid maskaxeed, kaas oo si ula kac ah qof loogu gaysto... Dhibkaas oo uu sameeyey masuul dawladeed ama uu sahlay ama uu ka raali noqday inla sameeyo ama uu arkayey waxna uuna ka qabanin. Heshiiska lagaga soo horjeedo ciqaabta (Convention against Torture) qodobka 1-aad oo ay Itoobiya sixiixday sannadkii 1994-tii.

9. https://www.hrw.org/sites/default/files/reports/ethiopia0608_1.pdf

booliska ee Deegaanka Soomaalida halkaas oo dadka rayadka ah si sharci darro ah loogu xidh-xidhi jiray xabsiyada sida ku meel gaadhka ah loogu hayo dadka ee ku yaala qabalayaasha, dagmooyinka, gobolada, xeryaha milatariga, kuwa liyuu booliska iyo xabsiyo aan sharci ahayn oo dhulka hoostiisa ku yaala iyaga oon la marinin nidaam cadaaladeed ama maxkamadba.

Jigjiga dhexdeeda, caasimada Deegaanka Soomaalida, waxaa la keenay dad laga soo qab-qabtay oo lagasoo eedeeyey dagmooyinka iyo gobolada loona taxaabay jeelasha caanka ah sida xabsiga dhexe ee jigjiga "Jeel Ogaadeen" kadib markay maxkamadu ku riday xukun cadaalada ka fog. Si kastaba ha ahaatee maxaabiistii siyaasada u xidhnayd inta badan waxaa lagu hayey xabsiyada kala duwan si aan sharci ahayn halkaas oo ay kula kulmayeen xad gudubyo baahsan oo ka dhan ah xuquuda aadamaha. Kuwa lagu eedeeyo in ay taageersanyihiin JWXO iyo ururada lagu calaamadiyay in ay yihiin argagixiso si ba'an ayaa loo waraysan jiray waxaana lagu hayn jiray goobo aan la aqoonin inta aan la xukumin kuwo kalana si toos ah ayaa Jeel Ogaaden loo gayn jiray iyaga oo aan la xukumin taas oo baal marsan hab dhaqanka maxaabiista ee ku cad xeerka ay ansixiyeen wasiirada heer fadaraal ee tirsigiisu yahay 138/2007' iyo cahdiga lagu aas aasay koomishinka heer fadaraal ee tirsigiisu yahay 365/2003. Sidoo kale waxaa digreetooyin kaas ka hor imaanayey, Jeel Ogaadeen muuna buuxinin hab-raacii aas aasiga ahaa marka laga eego dhinaca dhismaha, tasiilaadka iyo adeega laga rabay inuu yeesho xabsi. Jigjiga hareereheeda, lama aqoonin tirada rasmiga ah ee xabsiyada dhulka hoostiisa ku yaala ee ay isticmaalayeen laamaha amniga iyo kuwa sirdoonku si ay u baadhaan uguna ciqaabaan maxaabiista.

Xabsigii ugu daraa aad kana loo yiqiinay waa Jeelka dhexe, ee sida caadiga ah loo yaqaano Jeel Ogaadeen. Jigjiga waxay ahayd goobtii ay ku xidhnaayeen maxaabiistii ONLF looguna gaystay tacadiyada kala duwan.

## Jeel Ogaadeen

Jeel Ogaadeen wuxuu ahaa hoyga kumanaan maxaabiis ah oo laga keenay guud ahaan Deegaanka Soomaalida kuwaas oo aan waligood la maxkamadaynin ama loo xukumin wax dambi ah. Wuxu ku calaamadsanaa falal ciqaabeedyo jogto ah iyo bahdilaad u jeedadeedu ahayd in maxaabiista loo dhibaateeyo jidh ahaan iyo maskax ahaanba. Warbixintii 2018 hay'ada xuququl insaanka ee (Human Rights Watch) ee 'Waxaan la mid nahay kuwii dhintay' waxay si qodo dheer u faahfaahisay dhacdooyinka argagaxa leh ee ka baxsan bini aadamnimada iyo sumcad dil ujeedkeedu ahaa in maxaabiista lagu qasbo in ay qirtaan ka mid ahaan-shaha ciidanka ONLF iyo in ay bixiyaan xogo ku saabsan ururka[10].



10 https://www.hrw.org/report/2018/07/04/we-are-dead/torture-and-other-human-rights-abuses-jail-ogaden-somali-regional#_ftn70

Muxumed Cabdullaahi Guleed wuxuu xusuusanayaa nidaam-ciqaabeedkii j oogtada ahaa ee soomaray:

‘Kadib markay si isdaba joog ah madaxa igala dheceen qoriga shubkiisa, ayuu Cabdixakiim Maxamed Baaja kala jabiyey dhalo faanto wuxuuna igaga garaacay madaxa. Waxaan bilaabay dhiigbax aan kala joogsi lahayn. Cabadiraxmaan Labago’le ayaa dhahay “ugu dambayn waxaan arkay dhiiga Muxumed-anni”. Waxay iga siibeen dharka waxay ii reebeen buumada kaliya waxayna igu tuureen musqul qobays oo aad cidhiidhi u ah aniga oo ay labada gacmoodba iga jabanyihiin cumaacumta kor keeda. Subaxdii xigtay ayaa Cabdiraxmaan Labago’le layaab ku noqotay inaan noolahay. Wuxuuna yidhi “oo Muxumed-anni wali wuuba noolyahaye.”? Maalintii xigtay ayuu soo noqday wuxuuna yidhi “kan wali fadhiyaa miyuuna isagii ahayn” “ee hadlaya” isaga oo ishaarayay in aan wali si dhab ah la ii garaacin. Sadex bilood kadib ayuu ii sheegay madaxa maamulka iyo maxaabissta ee komishinka xabsiga Faraax Cabdi Bare “Faarax Yare” in aana xabsiga kabixidoonin maydkayga oo jawaan lagu sido mooye’

Maxaabiistii ONLF ee ku xidhnaa Jeel Ogaadeen waxay u adkaysteen dhibaatooyinkii cuslaa ee jidh ahaan iyo maskax ahaanba usoo gaadhay. Waxaa loo kala saaray laba qaybood: taageere 'seel' iyo ciidan 'hubaysane'. Kadib waxaa labadoodaba loo isticmaalay xadgudub iyo bahdilaad iyaga gaar ku ah oo ka baxsan bini aadamnimada. 2016-kii 280 maxbuus oo ubadan taliskii sare ee ciidamada ONLF oo ku xaraysnaa qolka 16-aad ayaa dalbaday baahiyad kii aas aasiga ahaa maadaama oo laga faquuqay maxaabiista inteedii kale. 4 maal-mood oo isku xigta ayaa loo diiday cuntada iyo biyaha, waxaana maalintii 6-aad soo gaadhay qolka 16-aad Cabdiraxmaan Labago'le (taliyihii ciidanka liyuu booliiska), 'Xaabsade' (madixii sirdoonka Deegaanka), Cabdixakiim Maxamed Baaja (koomishinka booliiska Deegaanka), Nuur Cabdi Maygaag 'Ilkacase' (koomishinka asluubta), Mukhtaar Suubane (lataliyaha dhinaca amniga ee madaxwaynaha), Cabdicasiis Mohamed Ali (madaxa xarunta dhaxe ee xisbiga lehna awood madaxweyne sadexaad) iyo Yasiin Cabdi Waris (hogaankii nabadgaliyada Deegaanka). Cabdiraxmaan Labago'le ayaa maaxaabiista usheegay:

> ‘Ma jirto wax xuquuq ah oo idinka maqan, Cabdi Maxamuud Cumar iyo aniga aya go’aaminay inaydaan xaq ulahayn inaad hadashaan- axmuqnimadiina xuquuq ayaabad raadinaysaan.’

Xiligan waxaa loo yiqiinay 'qiyaamihii yaraa' iyada oo lagu saleeyey xad gudubyadii ba'naa ee la mariyey 12 xubnood[11] oo ka mid ahaa 280-kii maxbuus oo lagu eedeeyey inay yihiin maskaxdii ka dambaysay cabashadii maxaabiista ka timid oo ay iyagu (dawladu) ugu yeedheen "afgambi". Mukhtaar Suubane iyo Ahmed Daahir ayaa si shakhsi ah ulahaa masuuliyada in maxaabiista lagu garaaco dhalooyinka soodhada iyo qoryaha shubkooda. Maxaabiistu waxay aad u xasuustaan ciqaabtii ka jirtay Jeel Ogaadeen ee loo yiqiinay "yuuqitaan" taas oo micnaheedu ahaa in qofku taagnaado hal meel ah maalmo badan sida dhagixii oo uuna dhinacna u dhaqaaqi karin, waxayna ahayd ciqaabta ugu xun jidh ahaan iyo maskax ahaanba. 2016-kii, 12-kii maxbuus ee lagu eedeeyey inay abaabuleen afgambi xilli ay dalbanayeen xuquuqo aas-aasi ah ayaa lagu amray inay taagnaadaan 7 maalmood iyo todoba habeen. Habeen waxaa dhacday in Casaanyo caguhu si xad dhaaf ah u barareen kadib ay qar-qarxeen oo ay siidaayeen dareere milil ah. Mid ka mid ah 12-kii maxaabiista ahaa oo sharxaya dhibaatadii soo martay ayaa sidan yidhi 'waxay ahayd ciqaabtii ugu darayd maskaxiyan ayeyna noo dishay'. Cutubkaa mugdiga ah ee ka midka ahayd taariikhda Jeel Ogaadeen waxay hay'ada ASVS u aqoonsatay 'Maalinta Madaw' oo loo asteeyey 6-da bisha 4-aad sanad walba.

## 2018-kii Isbadalkii siyaasadeed ee Itoobiya: maxaabiistii Deegaanka Soomaalida ugu xidhnaa siyaasada

Isbadalkii siyaasadeed ee ka dhacay dhamaan dalka Itoobiya horaantii 2018-kii wuxuu cutub horle ku kordhiyey taariikhdii cabudhinta ee EPRDF. Is casilaadii Haile Mariam Desalegn ee ku timid mudaaharaadyadii waawaynaa ee ay hogaaminayeen dhalinyarada Oromadu iyagoo dalbanayey isbadal iyo dimuqraadiyad waxay wadada u xaadhay guushii uu xukunka ku yimid Dr. Abiy Axmed.
Raysal wasaaraha cusub wuxuu balan qaaday inuu bilaabayo isbadal cusub oo ay ka mid tahay isbadal balaadhan oo uu ku sameeyo laamaha amniga[12], in uu soo celin doono xidhiidhkii caadiga ahaa ee ay la lahaayeen Ereteria waxayna rajo cusub ku abuurtay dareenka malaayiin Itoobiyaan ah oo ay saamaysay cadaawadii ka dhaxaysay labada dal taas oo socotay tobanaan sannadood. Isagoo raacaya isbadalkii cusbaa ee socday, wuxuu amray madaxwaynayaasha deegaanada in ay siidaayaan dhamaan maxaabiistii u xidhnaa siyaasada.



11 Magacyada 12-kii maxbuus, ee lagu eedeeyey inay ka dambeeyeen cabashadii: Muxumed Cabdullaahi Guuleed 'Muxumed-anni', Maxamed Maxamuud Maxamed 'Daaresalaam', Suldan Abdi Maxamed 'Casaanyo', Cabdiwali Shaafici Xusseen 'Xayraan', Sheekh Axmed Xusseen Yogol, Carab Nuur Bunow,Tamaan Muxuumed Faarax 'Xiiray', Xassan Cabdisamad, Suldaan Xukun Cabdullahi, Axmed Cabdi Xuseen 'Gadhyare', Maxamed 'Urur' iyo Nuur Caafi.

12 https://www.africanews.com/2018/04/15/ethiopia-pm-pledges-to-reform-security-sector-and-revisit-repressive-laws/



Dawlada fadaraalka ah ayaa siidaysay maxaabiistii siyaasada ugu xidhnayd gudaha iyo agagaarka Addis Ababa oo ay ku jireen xabsigii khatarta ahaa ee Maekelawi Jeel, Kaliti iyo kuwo kale. Dhinnaca kale Cabdi Iley, qorshayaal kale ayuu ka lahaa maxaabiiistii siyaasada u xidhnaa (ONLF) ee lagu hayey Jeel Ogaadeen.

**Jail ogaden prisoners**

*Source: BBC Somali*

Bishii 2-aad 2018-kii, BBC laanteeda afka soomaliga ayaa warisay in uu Cabdi Iley siidaayey dhamaan maxaabiistii siyaasada u xidhnayd. Warkaas waxaa la socday muuqaalo aan horey loo arkin oo ay ka muuqato tabar-darro ba'an, oo iyagoo boqolaal ah socda banaanka kore ee albaabka Jeel Ogaadeen. Sida uu sheegay maxbuus la waraystay, 1-dii bishii 2-aad 2018-kii waxaa gaar loo soocay maxaabiistii u xidhnaayd ONLF, sidii horeyba loogu sooci jiray, waxaana la keenay barxada Jeel Ogaadeen. Mukhtaar Suubane (lataliyihii dhinaca amniga ee madaxwaynaha) ayaa u sheegay in lasiidaynayo sababtuna ay tahay inuu Cabdi Iley cafis u fidiyey. Kadib waxaa laga qaaday sawiro, waxba mayna ka ogayn in isbadal siyaasadeed ka socdo Itoobiya sawiradana lagu marin habaabinayo bulshada oo looga dhigayo in maxaabiistii ONLF lasii daayey.

2-dii bishii 2-aad 2018-kii ayaa ku dhawaad 728 maxaabiis ah laga qaaday Jeel - Ogaadeen oo la geeyey mid kamida hoolasha shirarka ee Jigjiga 'Hoolka Sayyidka' si uu halkaas ugula hadlo Cabdi Iley oo ay weheliyaan xubno lagasoo xulay madax dhaqameedka iyo mid ka socday dawlada. Cabdi Iley wuxuu sharaxay inayna hada suuragal u ahayn inuu siidaayo maxaabiista saacadaas balse loo qaadi doono meel aad u fog halkaas oo ay gabi ahaanba xoriyadooda helayan. Intaas wuxuu raaciyey in la siin doono xoolo nool, dhul beereed iyo inay xitaa iyagu guryo dhisan doonaan. Dareenkii rajada abuuray ee laga dareemay wadanka intiisa kale oo ahaa in uu bilawday isbadal cusub, wuxuu saameeyey Deegaanka Soomaalida taas oo ay cadayd Cabdi Iley in uuna niyad u haynin siidaynta maxaabiistii siyaasada u xidhnayd. Xaqiiqdii, waxaa loo waday xabsi cusub oo ay macquul ahayd xitaa in uu kasii dhib -badan yahay Jeel kii hore iyaga oo la daalaa dhacayey xanuuno jidhka aha iyo kuwo maskaxiyan ahba. Xitaa maxaabiistii Soomaalida ee Abiy Axmed kasoo daayey Jeelasha Maekelawi iyo Kaliti waxaa dib loogu xidh xidhay Jeel Ogaadeen markay imaadeen Deegaanka Soomaalida.


Maxaabiistii waxaa loo qaybiyey labo kooxood, koox waxaa loo qaaday kooleejka tababarka macalimiinta (TTC) kooxdii kalana waxaa loo qaaday kooleejka kal-kaaliyeyaasha caafimaadka halkaas oo ay ku xidhnaayeen 20 maalmool waxaa gudaha iyo dusha sare ee dhismaha labadaba ka ilaalinaayey ciidamada liyu booliska, si ay ula socdaan dhaq-dhaqaaqa maxaabiista. 728 maxbuus oo ka mid ahaa maxaabiistii u xidhnaa ONLF waxaa laga qaaday Jigjiga waxaana la geeyey Bayaxow, oo ka tirsan gobolka Shabeele ee laga xukumo magaalada Godey. Mar dambe waxaa lagu soo kordhiyey 80 maxbuus oo kale oo u badan curyaamiin oo laga keenay Jeel Ogaden.

Intii u dhaxaysay bishii 2-aad ilaa bishii 8-aad ee 2018-kii, 808- dii maxbuus ee u xidhnaa siyaasada ONLF kuwaas oo ku xidhnaa Jeel Ogaadeen inta udhaxaysa 2 ilaa 12 sano ayaa loo dooray in ay ciqaabta xabsiga kusii wataan meel baadiye ah oo aynan arki karin indhaha dawlada dhexe iyo kuwa caalamkuba. Bayaxow ha loo aqoonsado in uu ahaa Jeel Ogaadeen oo la fidiyey iyo sii socoshada ciqaabtii iyo xad gudubyadii ka dhanka ahaa xuquuqul insaanka kuwaas oo ay maxaabiistu kala kulmayeen Jeel Ogaadeen. Iskabadaa in uu u hogaansamo cadaadiskii dawlada dhexe kaga imanaayey e, wuxuu go'aansaday (Cabdi Iley) in uuna siidaynin maxaabiistii u xidhnayd siyaasada.

Duruufihii ku hareeraysnaa Bayaxow waxay ahaayeen kuwo aan innaba la ogaan Karin ilaa bishii 8-aad 2018-kii xilligii Cabdi Iley ay xilka ka tuurtay dawlada Itoobiya, taas oo albaabada u laabtay nidaamkii cabudhinta ku dhisnaa isla markaana suura galisay nolosha uu shacabka Deegaanka Soomaalidu maanta haysto.

## Bayaxow

Marka dib loogu noqdo nolosha runta ah ee Bayaxow, waxay ahayd meel lamadagaan banaan ah oo aad u dabayl badan. Waxay ku taalaa qiyaastii kala baadhka inta u dhaxaysa Godey iyo Qalaafo oo u jirta masaafe dhan 45 kiilo mitir dhinac walba. tuulada ugu dhaw oo la yidhaahdo 'Karinka' waxay u jirtaa qiyaastii 2 kiilo mitir, meesha tuulada Budhle ay Bayaxow u jirto 5 kiilo mitir oo kaga beegan dhanka qalaafo. Markii maxaabiista lageeyey bishii 2-aad 2018-kii, waxay ahayd lamadagaan banaan oon lahayn wax dhisma ah ama adeega aas-aasiga u ah nolosha bini aadamka waxaana ka jirtay abaar daba-dheeraatay mudo 5 sannadood ah. Meesha ugu wayn ee biyaha laga helaana waa wabiga shabeele oo Karinka u jirta 5 kiilo mitir kagana beegan dhinaca koonfurta biyahaas oo aan ku haboonayn in ay dadku si dag dag ah u isticmaalaan sida ay cadeeyeen inta badan maxaabiistu way ku xanuunsadeen biyaha markii ay ku cusbaayeen goobta.




Boundaries are approximate and Unofficial

**Map by FAO**

Sida uu Cabdi Iley ku sheegay khudbadiisii uu maxaabiista ugu jeediyey Jigjiga inta aan la qaadin Bayaxow, in loo baahan yahay maxaabiista in ay u noqoto bilaw cusub, oo ay helayaan fursad lagu siin doono xoolo nool, mushaar ay ku qaataan shaqada dhismaha, iyo boosas ay dagaan. Si kastaba ha ahaatee, maxaabiistii waxay ogaadeen in ay Bayaxow taalo musiibo 'xeradii qasabka' halkaas oo ay wakhti gooda ku dhamaysan doonaan dhisida guryo ay ka bilaabeen meel ebar ah iyaga oo ay xaaladoodu kasii daraysay jidh ahaan iyo maskax ahaanba kadib markay sannado badan ku soo qaateen Jeel Ogaadeen. Masuul khabiir ah oo soo arkay goobta ayaa ku sifeeyey Bayaxow 'xabsi dusha ka banaan' iyadoo lagu doortay baadiyenimadeeda sida ay u fogtahay iyo cidlonimada. Cabdi Takhal Faarax, oo sheegay in uu yahay taageere ONLF kuna dhamaystay Jeel Ogaadeen 9 sano ayaa yidhi:

Marka la eego culays kii siyaasadeed ee madaxda wadanka lagu saaray in ay siidaayaan dhamaan maxaabiistii siyaasada u xidhnayd, macquul ma ahayn in Jeel Ogaadeen nalagu sii hayo, sidaas daraadeed halkaas ayey noo gudbiyeen 'Bayaxow'. Laakiin maxaabiis ayaan ahayn'.

# Maamulkii Bayaxow iyo dadkii furaha u ahaa

Marka la eego shaqaalihii hore ee shirkada ganacsiga ee Liyu Interprise, waxay ahayd shirkad dawladeed taas oo fulisa qandaraasyada dawlada, wasaarada maaraynta musiibooyinka iyo khataraha ayaa shirkada ganacsiga ee Liyu Interprise siisay mashruuca Bayaxow. Dhanka kale shirkada nashqadaynta oo sidoo kale ahayd shirkad dawladeed ayaa iyaduna masuul ka ahayd nashqadaynta guud ee mashruuca. Shirkadahan waxaa loo yiqiinay in ay u yihiin difaac una isticmaalaan ilo dhaqaale oo ay ka helaan faa'do shakhsi ah Cabdi Iley iyo kooxdiisii.
Dhanka farsamada goobta mashruucu ka socday waxaa hogaaminayey farsamo yaqaano, dhamaan qaybaha kale ee mashruuca oo ay ka mid yihiin maamulka dhaqaalaha iyo kormeeerka maxaabiista (sida jadwalka shaqada, cuntada, wakhtiga jiifka iwm.) iyo shaqaalaha goobta dhamaan waxay hoostagayeen Mukhtaar Suubane, lataliyaha dhinaca amniga ee madaxwaynaha. Nidaam ahaan, wasaarada amnigu door muuqda kuma lahayn mashruuca. Dhinaca kale Mukhtaar Suubane, sida uu inta badan u dhaqmi jiray, waxaa si shakhsi ah kalsooni u siiyey madaxwaynihii hore "Cabdi Iley".

Doorka maamul ee uu Mukhtaar Suubane ku lahaa Bayaxow wuxuu ahaa mid muhiim ah wuxuuna qaabilsanaa waraysiyadii
xadgudubka ahaa iyo ciqaabtii Bayaxow oo uu kasoo min guuriyey qaabkii loola dhaqmi jiray maxaabiistii hore ee Jeel Ogaadeen. Sidoo kale Bayaxow maxaabiistu waxay si cad u sawirteen in ay ciqaabtii Jeel Ogaadeen uun kusii wadanayaan xabsiga Bayaxow. Arintani waxay gaar u qusaysay kiisaska maxaabiistii u xidhnaa siyaasada (ONLF) kuwaas oo uu Mukhtaar Suubane saamayn kulahaa isku dubaridka qudaadarka/su'aalaha la marinayo ee la xidhiidha xadhigooda, iyo nidaamkiisii shakhsi ahaan uga daganaa ciqaabta maxaabiista.

Masuul sare oo ONLF ah kaas oo la soo xidhay 5-tii bishii 1-aad 2014-kii ayaa cadeeyey in shakhsiyan isaga ay qudaadareen/imtixaameen Mukhtaar Suubane iyo Cabdiraxmaan Cabdullaahi Buraale ' Labago'le' – la taliyihii amniga deegaanka iyo taliyihii ciidanka liyu boosiilka – intaan loo gudbinin Jeel Ogaadeeen. Arintan waxay u soo bandhigeen hanti badan si ay uga helaan maxbuuska siraha qarsoon ee muhiimka ah maadaama uu xubin sare ka yahay ONLF dhexdeeda.




*Maxamed Maxamuud,
babaade Bayaxow iyo Jeel Ogaadeen,
Hadana ah Maareeyaha ASVS*

"Culays badan oo lagu saarayey maamulka in Bayaxow ay tahay xabsi kale oo wali maxaabiistii lagusii hayo awgeed ayuu Suubane noo soo diray wariye ka hawl gala gudaha isaga oo markaas joogay Jigjiga. Wariyihii ayaa sameecada u furay Suubane wuxuuna bilaabay in uu la qabadsiiyo wariyaha siduu noo waydiin lahaa su'aalaha iyo sidaan uga jawaabi lahayn. Wariyihii ayaa na waydiiyey halkan ma maxaabiis ayaad ku tihiin iyo miyaad ka laabateen fikirkii ONLF nimada ee aad aaminsanaydeen kadibna wuxuu noo sheegay in aan ku jawaabno 'maya ma nihin maxaabiis manaanaan ka tanaasulin ONLF'. Si ay xaqiiqada maxbuusnimadana uga leexiyaan caalamka intiisa kale.

Waaxda kormeerka iyo qiimaynta ee xafiiska madaxwayna ayaa loo idmaday in ay ilaaliyaan dhaqaalaha iyo in ay kormeer ku sameeyaan sida lacagihii loo isticmaalay. Si kastaba ha ahaatee, waxkasta oo la xidhiidha dhaqaalaha waxaa si buuxda gacanta ugu hayey Mukhtaar Suubane waxaana u fududeeyey Najiib Sheekh; manqal hayihii guud ee mashruuca wuxuuna lacagta ku shubay akoonkiisa isaga oo si toos ah u fulinaya amarka Suubane. Intaas waxaa dheer, waaxda kormeerka iyo qiimaynta ee ka socday xafiiska madaxwaynaha wuxuu sheegay in Xaliimo Maxamud Cumar, oo ah Cabdi Iley walaashiis, in ay shirkadeedu keeni jirtay dhamaan qalabka dhismaha ee mashruuca galaya.

Ilo wareedyo kasoo baxay xafiiska Cabdi Iley ayaa sheegay miisaaniyada loo qabtay mashruuca Bayaxow in uu ahaa seddex bilyan iyo shan boqol oo kun oo milyan (3.5b) oo Birr. Miisaaniyada oo aad u balaadhnayd awgeed ayaa waxay kormeerayaashu sheegeen in ay ku deeqeen ilo ka madax banaan maamulka dawlad deegaanka.

Shuruudo qarsoodi ah, qaar ka mid ah shaqaalihii xafiiska madaxwaynaha iyo farsamo yaqaanadii shirkada ganacsiga ee Liyu Interprise ayaa sheegay in aan loo ogolayn in ay goobta shaqada uga baxaan dhanka Qalaafo ama dhinaca Godey si looga ilaaliyo bulshada ku hareeraysan, looma ogolayn in ay dhex galaan maxaabiista ama xitaa shaqaalaha ka socda waaxyaha kale. Sidoo kale, shaqaalaha shirkada ganacsiga ee Liyu Interprise, kuwa shirkada naqshadaynta, iyo maxaabiistaba dhamaan mid kasta waxaa lageeyey goob gaar ah oo ka fog midka kale Kaliya shaqadoodu waxay ahayd kormeerka dhismaha guryaha-

xaqiijinta helitaanka qalabka dhismaha loo baahan yahay, iyo inay warbixin ka diyaariyaan wax ay ugu yeedheen hormarka dhismaha socda ka dibna kula noqdaan xafiiska madaxwaynaha. Xeel-dheereyaasha ka shaqaynayey goobta waxay u xidhnaayeen si lamida sida maxaabiista oo xitaa looma ogolayn in ay fasax qaataan. Natiitijo ka dhalatay dabinkan ayey shaqaale badan go'aan sadeen in ay habeenimo ka baxsadaan goobta.

Dhawr bilood gudohood, shaqaale badan oo xeel-dheereyaal ah oo ka kala socday waaxyaha dawlada ayaa mid-mid uga baxsaday goobta oo ay ugu wacnayd (baxsiga) sidii xumayd ee ay ula dhaqmayeen kuwii xerada haystay dhamaan dadkii meesha ku sugnaa, gaar ahaan maxaabiistii. 'Waxay sameeyeen wax kasta oo ay nagaga ilaalin kareen dadka iyo bulshada, gabi ahaanba wayna takooreen' sidan waxaa yidhi maxbuus hore oo soo qeexayey tagoor kii lagu kordhiyey Bayaxow.

## Fashilkii guryihii Bayaxow

Maxaabiista waxaa loo sheegay in u jeedada laga lahaa mashruucii Bayaxow uu ahaa labo arimood: in guryo loo dhiso barakacayaasha iyo in ay maxaabiista laftoodu guryo dhistaan. In 800 oo guri oo ay maxaabiistu leeyihiin iyo 2400 oo guri oo ay leeyihiin barakacayaasha[13] qoloji laga dhiso Bayaxow. Guryaha loo dhisayo Labada qaybood midkasta waxaa loo sameeyey naqshad u gaar ah; guryaha barakacayaasha waxaa loo dhisay naqshad wareeg ah, oo cabir koodu yahay, kuwa maxaabiistana waxaa loo dhisay naqshad afar gees ah, 5 mitir oo dheerar ah iyo 4 mitir oo balac ah, midkastana yahay 250 kaara mitir oo dhul ah.




Mid kasta oo ka mid ah 10-ka dagmo ee Shebeele waxaa la siiyey qandaraas hoosaad ay ku dhasayeen qayb ka mid ah 2400 ee guri ee loogu talagalay barkacayaasha; dagmadiiba labo qof oo matasha ayaa u joogtay goobta. Dagmo kastana waxay heshay 50 guri inay dhisto waxayna isku noqdeen 500 oo guri. Sidoo kale, Samsam group oo ah shirkad gaar loo leeyahay waxay heshay qandaraas hoosaadka isbitaal iyo dugsi sare. Sidoo kale 12 ka mid ah farsamo yaqaanadii waxay heleen qandaraas hoosaad ay ku dhisayaan guryaha barakacaasha qayb ka mid ah kuwaas oo ay maxaabiistu ugu shaqaynayeen kuuli ahaan, iyagoo ka caawinayey dhisida guryaha barakacayaasha isla markaana dhisanayey guryohooda maxaabiis ahaan.



13. Waxaa jira warar is khilaafsan oo sheegaya in wax uun ka mid ah miisaaniyadii loo qoondeeyey barakacayaasha Bayaxow la gaadhsiiyey sida ay ishaareen ilo wareedyo laga helay dawlada ayaa ah in ayna barakacayaashu kuba jirin qorshihii assalka ahaa ee Bayaxow.

# Dhibaatooyinkii Bayaxow: xabsi joogto ah, qassab ku shaqayn iyo si xun ula dhaqan

Sida ay cadeeyeen waraysiyadu ciqaabtii iyo xad-gudubyadii xun-xumaa ee ka jiray Jeel Ogaadeen awgood, xaalada caafimaad ee maxaabiistii loo qaaday Bayaxow waxay ahayd mid aad u liidata, xaalada ay kujireena runtii ma ahayn mid ay shaqo adag ku qaban kareen lama dagaankii Bayaxow. Cimiladii adkayd iyo xaaladii Bayaxow, loona doortay baadiye nimadeeda, ma ahayn meel lagu noolaan karay gaar ahaan maxaabiistii aadka u jilicsanayd kuwaas oo baahi daran u qabay in ay helaan daruuriyaadka aas-aasigah sida cunto, biyo iyo caafimaad. Qayb maxaabiistii ka mid ah waxaa loo keenay furaashyo jilicsan bilka dib wakhtigii nala keenay Bayaxow meesha inta kalena ku seexan jireen boco. Kuwa awooday in ay helaan wax uun qalab ah oo dheeri ah waxay isku dayi jireen in ay dhistaan buul yar oo macmal ah.

Maxbuus hore ayaa ka sheekaynaya ciqabihii khatarta ahaa ee ka soo maray deegaanka:

'Bayaxow waxaa nala keenay xilli jiilaal ah, waxaa sii dheerayd abaar, mudo 5 sano ah kama di'in wax roob ah, wax ceel ah malaha meeshu, balse, dadku waxay u arooraan wabiga oo ka durugsan dhawr kilo mitir, biyuhuna waa dhoobo oo sinaba suurtagal uma ahayn in la cabo, maxaabiistii durba way ku xanuun sadeen markay cabeen biyihii, waxaa dilaacay shuban-biyood kaas oo sii wiiqay tabartooda, maanaan haysanin meel aan seexano, afar teendo oo y aryar ah ayaa la keenay Bayaxow kuwaas oo loo keenay Mukhtaar Suubane iyo kuwii la shaqaynayey'.

Marka la eego siduu sheegay qandaraasle ka socday shirkada ganaciga ee Liyu Interprise, maxaabiistu waxay qabanayeen culays kii ugu adkaa ee looga baahnaa shaqada dhismaha. Waxay dajin jireen qalabka dhismaha, waxay qasi ji reen shamiitada, waxay samayn jireen inta u dhaxaysa 30,000 ilaa 42,000 oo bulukeedi ama jaajuur ah maalin kasta, wayna rastayn jireen. Wuxuu arkay in ay maxaabiistii laga keenay Jeel Ogaadeen aad u tabar daraayeen, ayna xaalada qalafsan ee Bayaxow la suuxaan 50 maxbuus maalin kasta daal iyo nafaqo daro lagana rabay in ay 18 saacadood shaqeeyaan maalin kii. Shaqadii adkayd ee ay ku qabanayeen cimiladii aadka u kululayd waxaa ugasii daraa wakhtigii dheeraa ee ay maalintii shaqaynayeen. Maxaabiistu waxay shaqayn jireen 5:30 subaxnimo ilaa 5:30 galabnimo oo ay nasashadu xadidnayd maxaabiista qaarkeedna habeenkii oo dhan waxay baabuurta ka dajin jireen qalabka dhismaha.



13 Waxaa jira warar is khilaafsan oo sheegaya in wax uun ka mid ah miisaaniyadii loo qoondeeyey barakacayaasha Bayaxow la gaadhsiiyey sida ay ishaareen ilo wareedyo laga helay dawlada ayaa ah in ayna barakacayaashu kuba jirin qorshihii assalka ahaa ee Bayaxow.

14. Kare meter cabirka halbeega itoobiya



"Wixii iiila yaabka badnaa wuxuu ahaa sidii shakhsiyaadkii qaaxadu haysay (TB) sananadanada soo xidhnaa aad kana u dhuubnaa una tabar daraa loogu qasbayey in ay dajiyaan shamiitada qabtaana shaqooyinka adag. Waxaan xusuustaa maalin ay 96 qof la suuxeen daal. Ruuxii isku daya in uu fara galiyo kuwa aan qaban karin shaqadan adag waxaa lagu eedayn jiray in uu ka soo horjeedo mashruuca ama uu shaqada diidan yahay waana la ciqaabi jiray."

*Axmed Ibraahim Cabdi,*
*babaade Bayaxow iyo Jeel Ogaadeen,*
*Hadana ah Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka ASVS*

Maxbuus hore oo Bayaxow soo maray ayaa qeexay in uu habeenkii ku dhamaystay siduu u dajinayey shamiito iyo qalabka kale ee dhismaha meesha uu maalintii oo dhana ku dhamaystay dhisida guryaha. Maxaabiistu wax khibrad ah mayna u lahayn shaqada dhismaha, taasina waxay sababi jirtay in qalabka ay ka shaqaynayaan khataro ka soo gaadhaan. Khatarta ka imaanaysay ka shaqaynta qalabka dhismaha ee ayna aqoonta u lahayn waxaa ka dhalan jirtay in ay dhismayaashu kusoo dumaan maxaabiista isla markaana dhaawacyo ka soo gaadhaan maadaama oo ay u dhiseen si aan sax ahayn. Bayaanka soo socda waxaa sheegay maxbuus soo maray Jeel ka wuxuuna taabtay dhaawacyo kala duwan oo ka soo gaadhay shaqadii khatarta ahayd ee ay qabanayeen taas oo iyaga oo aan loo tababarin ay xaalad adag ku shaqayn jireen.

'Maalintii ugu horaysay ee dhismaha, 50 maxaabiis ah ayaa lagu qoray in ay dajiyaan jawaano shamiita ah, dhamaan maxaabiistuna umayna la haydn wa khibrad ah, qorax kulayl kii xad dhaafka ahaa awgii, ragii waxay iska bixiyeen shaatiyadii waxayna tunka ku qaadeen shamiitadii. Arintani waxay dhibato xun soo gaadhsiisay jidh koodii, qaar ka mid ah, jidhkooda diirkii ayaa ka dhacay oo hilib kii ayaa bananka yimid. Isku celcelis maalintii, ku dhawaad 40 maxbuus ayey soo gaadhijeer qayb ka mid ah dhaawacyadu ama loo qaadi jiray qolka deg dega (emergency room) shaqadii xad dhaafka ahayd awgeed'

Muxumed Cabdullaahi Guuleed ayaa sharaxaya noocyo badan oo ah dhaawacyada kala duwan kuwaas oo maxaabiista ka soo gaadhay shaqadii dhismaha. Tusaale yar, 475 ruux ayey dhaawacyo kasoo gaadheen qaadista jiingadaha, ku dhawaad 127 qof ayey nabrihii jiingada ka soo gaadhay ku abloobeen (teetano ku noqdeen) waxaana keentay farsamo la'aanta ay ku dhisayeen guryaha. 27 ruux ayey soo gaadheen dhaawacyo khatar ah sida inay gacan ama lug ka jabeen kadib markay dhismayaal ku dumeen ama kusoo dheceen kuwaas oo ay si xun u dhiseen sababtoo ah waxaa lagu khasbay inay dhismaha ka shaqeeyaan iyagoon wax tababar ah la siinin markii hore. iyaga oo dhexda kaga jira qabashada qalabkaas khatarta ah, maxaabiista waxaa lagu khasbi jiray in ayna caawin karin kuwooda baahiyaadka gaarka ah qaba sida kuwa maskixiyan dhibaatadu uga soo gaadhay sannadihii ay Jeel Ogaadeen ku jireen, balse waxaaba laga rabay in ay ka qayb qaataan hawsha dhismaha si lamid ah sida qof kaste looga rabay.



"Qofna loogama naxaynin shaqadii dhabar jabiska ahayd ee lagu shaqaynayey qoraxdii naarta ahayd iyo saacadaha aan dhamaadka lahayn, xitaa kuwii maskaxiyan u jiranaa, ama kuwii ay korkooda ka muuqatay dhibaatadii cuslayd ee ka soo gaadhay ciqaabtii sannadaha socotay ee Jeel Ogaadeen; ee la garanayey in ay ku baaheen cudurada caabuqa ka dhasha. Xitaa kuwii naafada ahaa mayna badbaadin; bishii 6-aad 2018-kii waxaa naloogu keenay Bayaxow 80 maxbuus oo naafo ah oo Jeel Ogaadeen laga keenay. Badhkood Jeel Ogaadeen ayaa laxaadka lagaga jaray"

*Maxamed Xusseen Kilaas, babaade Bayaxow iyo Jeel Ogaadeen, Hadana ah Agaasinka Waaxda Barnaamijyada ASVS*

Intaas waxaa dheeraa. Siduu sheegay Muxumed Cabdullaahi Guuleed, taliyeyaashii Bayaxow waxay qaban jireen kulamo qiimayn ah, deegaanka waxaa looga yaqaanaa 'gemgeme' (waa qiimayn loo fuliyo si koox koox ah), waa meesha lagu ogaado sida ay maxaabiistu u fuliyeen shaqada. Waxay na xusuusinaysay qiimayntii golayaashii ceebeed 'gemgene' ee Jeel Ogaadeen[14]. Hadii loo bogi waayo shaqadaada waxaad mutaysan in lagugu khasbo inaad shaqayso saacado dheeri ah. Inkastoo maxaabiista loo qoon deeyey in ay ku shaqeeyaan 200 oo birr maalin kasta, hadii lagu qanci waayo shaqadaada waxaa lagaa goyn lacagtaada oo lagasoo reebi jiray 150 ama 100 birr kuwo badana waxba lama siin jirin gabi ahaanba.



14 https://www.hrw.org/report/2018/07/04/we-are-dead/torture-and-other-human-rights-abuses-jail-ogaden-somali-regional#_ftn70

Iyada oo ay taagnaayeen dhaawcyadii dhibka badnaa ee jidh ahaan iyo maskax ahaanba ka soo gaadhay wakhtigii dheeraa ee ay ku jireen Jeel Ogaadeen, Bayaxow waxay ahayd khatar kale oo soo wajahday maxaabiista. Cabdi Takhal Faarax 9 sanno ayuu ku xidhnaa Jeel Ogaadeen halkaas oo uu ka qaaday cudurka qaaxada (TB) 2014-kii taas oo aan laga daawaynin. Isagoo aad u xanuunsan ayaa loo qaaday Bayaxow, lamana siinin dhar quman iyo meel uu seexdo toona.

'Waxaa na cunay cayayaan badanaa laga helo lama dagaanka sida Bayaxow oo kale ah, shaqadii xad dhaafka ahayd ee la igu khasbi jiray inaan dusha ku xamaalo, aniga oo la ildaraa xanuun- dhaawac ayaa igasoo gaadhay meesha laf-dhabarta ku quman, waxaana dareemaa ilaa maanta saamayntii uu igu reebay jaajuur kii lebenka ka samaysnaa ee aan qaadi jiray'.

Dhibaatooyinkii wakhtiga dheer nagusoo maray Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow waxay saamyn xun ku yeesheen fayo qabka jidheed iyo maskaxeed ee maxaabiistii soo badbaaday. Kuwo badan waxaa wali ka muuqda ama ay la nool yihiin xanuunkii ay ka qaadeen wakhtigii dheeraa ee ay Jeel Ogaadeen ku jireen iyo dhibaatadii ka dambaysay ee Bayaxow, meesha kuwo kalana ayna suuragal ahayn in ay ka badbaadaan dhaawacyadii loogu gaystay jidhdilka, sixun ula dhaqanka, iyo dayacaada. Dayib Maxamed wuxuu dhintay 28-dii bishii 11-aad 2018-kii waxyar uun ka dib markii lagasoo daayey Bayaxow. Sidoo kale, Faysal Kaad Cabdi, Mahamud Sh. Cabdi Budul 'Baari,' Juned Macalin Maxamed, Nuure Maxamed Budul 'Nuure Goodi' iyo Gaanbe Hure Xasan 'Xassan Gaabane' dhamaantood waxay dhinteen lagasoo bilaabo 2018-kii kadib markay isu raaceen 10-kii sanno ee Jeel Ogaadeen iyo 6-dii bilood ee Bayaxow.

## Xornimadii kadib

Shaqadii khasabka ahayd iyo xabsigii dabada dheeraa ee Jeel Ogaadeen waxay maxaabiistii soo badbaaday ku reebeen saamayn aan dhamaad lahayn. Markii lasoo daayey bishii 8-aad 2018-kii, maxaabiistu waxay la kulmeen caqabado adag waxayna la qabsan waayeen noloshii banaanka tiilay ileen waxay dhex yimaadeen bulsho cusub iyo deegaan siyaasadeed e. Mayna haysanin wax hanti ah mana soo galaynin wax dhaqaale ah oo ay ku maareeyaan naftooda iyo reerihii ay kala maqnaayeen mudadii dheerayd ee ay xidhnaayeen. Tani waxay sababtay in ay qoysas badani burburaan.

Wakhtigii dheeraa ee maxbuusnimadu waxay sii kordhisay maxaabiistii xiskooda luminayey halka ay kuwo badana waayeen caafimaadkii jidheed, noloshii aas-aasiga ahayd iyo faya-qabkii maskaxeedba. Maxaabiistii hore waxay la daalaa dhacayaan waxyeeladii jidheed ee kasoo gaadhay jidhdil kii ku socday wakhtiga dheer iyaga oon helaynin wax caafimaad ah. Xaaladaha muuqda ee inta badan laga sinaa waxaa ka mid ahaa dhaawacyadii kala duwanaa ee maxaabiista curyaamiyey sida xanuun xad dhaaf ah, gacmaha iyo lugaha oo si xun loo jaro, dhibaatada soo noqnoqnaysay ee qaaxada (TB) aan la daawaynin, noocyada caabuqa kala duwan ee ay dhaawacyadu qaadayeen sida dhaawacyadii xabadaha, neerfayaashii dhibku soo gaadhay oo kamid ahaayeen, saamayntii dhaawacyadii aan la daawaynin iyo xanuunadii oo ay barbar socdeen nafaqo la'aantii iyo jidh dilkii oo iskaashaday waxay sababeen in maxaabiista qaarkeed dhaga beelaan badh kalana indho beelaan, meesha qaar kalena u dhinteen dhaawicii kasoo gaadhay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow awgii.

Cabdi Cumar Dhicis wuxuu ahaa mid ka mid ah maxaabiistii hore ee faraha badnayd ee muuqaal ahaan la daalaa dhacayey ciqaabtii xiliga dheer ee Jeel Ogaadeen, ka dibna ay ugasii dartay Bayaxow.

Garaacii Jeel Ogaadeen iyo xaaladii adkayd ee Bayaxow awgood, waxaan beelay dhagta bidixda ah. Sidoo kale wuxuu dhaawac aan bogsanaynin igasoo gaadhay neerfaha cagaha ciqaabtii iyo saacadihii badnaa ee la igu khasbay inaan taagnaado awgood'.

Maxaabiistii hore ma awoodaan in ay maareeyaan kharashka ku baxaya dhaawacyada yaryar, sidaas dardeed waxay u baahan yihiin caawimaada xubnaha qoyskooda ama in ay deeqo helaan. Si kastaba ha ahaatee, kharashka badan ee ku baxaya daawaynta iyo nidaamka sida qaliinka ay badanaa u baahan yihiin maxaabiistii hore, wuu ka baxsan yahay awoodooda. Tani waxay kor uqaaday tirada maxaabiistii kasoo badbaaday Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow ee ka quusanaysa inay dib u helaan caafimaad koodii, noloshii, iyo inay dib u dhex galaan bulshada.

# Xanuunada dhimirka iyo jugta madaxa

Jugtii maskaxeed waxay reebtay dhibaatooyin hor istaagay nolosha maxaabiista, tusaale yar, calaamadaha buuqa iyo khalkhalka ee ka dhashay jugtii maskaxda horay ugasoo gaadhay ayaa ku badan maxaabiistii hore waxayna badanaa ka tustaa inay naftooda takooraan oo ay is go'doomiyaan, iyagoo miciinsada ama dib ugu noqda xusuuso hore, fikiro khaldan, iyo cuqdad. Waxaa muhiim ah in aan hoosta ka xariiqno oo aan makhraati ka nahay in ay dhibanayaal badani u adkaysteen culaysyadii maskaxeed ee ka soo maray Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow, balse xaqiiqdii waxaa baabi'isay noloshii Bayaxow ka dambaysay. Sababta ay kaga badbaadeen dhibaatadii xabsiga waxay ahayd rajadii ay filanayeen xabsiga ka dib. Hase yeeshee, mayna helin wax caawimaad ah si ay dib ugu dhex galaan bulshada taas oo ay ku han waynaayeen in ay helaan waxaana ku adkaatay in ay noloshooda u habeeyaan sidii dad xor ah.

Sidan waxaa yidhi Axmed Ibrahim Cabdi 'Qaahira':

'Bayaxow kadib noloshu way adkaatay. Bilawgii isbadalka rajo wayn ayaan qabnay, laakiin nasiibdarro, maanaan helin wax caawimaad ah ama taageero ah. Marar ayaan isku daynay in aan wax qabsano, balse mar kaste waxaan la kulmaynay takoor xad dhaaf ah, gaar ahaan dhinaca maamulada dagmooyinka. Tusaale, waxaan isku dayey inaan u tartamo qandaraasyo mashruuc ay dawlaadu bixinaysay, laakiin waa la ii diiday xitaa inaan galo faltaxa tartanka aragtidayda siyaasadeed awgeed.'

Shaqsiyaad lagasoo daayey Bayaxow waxay sheegaan in xitaa laga takooray ka qayb galka fursadaha dawlada sida, (shaqada, qandaraaska iwm.) gaar ahaan gobolada iyo dagmooyinka. Meesha dhaawacyada muuqda iyo jugta maskaxeed ayna suuragal u ahayn in ay maxaabiistii hore samaystaan nolol, kuwooda awooday in ay shaqo raad sadaana waxay bulshada kala kulmayeen caqabado labo jibaaran xidhiidh kooda ONLF awgii, iyo istaakullada takoorka qayaxan. Arintani waxay sababtay in ay dib udhisi waayaan noloshooda iyo in ay buuxin waayaan booskii ay ku lahaayeen bulshada. Takoorida maxaabiistii hore kuma ekayn oo keliya shaqaalaynta balse waxay saamaysay ku noqoshada waxa barashadii heerka sare.

Waliba, dareenka ka tagida iyo dayacaadu wuxuu si wayn ugu fiday dareenka ehliyada/qaraabada maxaabiistii hore. Taas oo ah in aan la siinin wax caawimaad ah, gaar ahaan dhanka dawlada oo ay rajo wayn ka qabeen markii hore, ayaa sii xumaysay xaalada xanuunadii maskaxeed ee maxaabiistii hore. Maxamuud Muxumed Axmed, sida kuwo kale oo badan, wuxuu ka soo baxay Bayaxow isaga oon waxba haysanin isla markaana la ildaran xaalad caafimaad darro maskaxeed iyo jidheedba.

Xubno ka mid ah qoyskiisana isaga lalasoo xidhay, reerka intiisii kalana laga kaxaystay dhamaan xoolihii iyaga oo ciqaab looga dhigayo. Maanta, wuxuu la noolyahay calaamadaha isla hadalka iyo khalkhalka ee jugtii maskaxeed isagoo la daalaa dhaca inuu maareeyo noloshiisa.

'Aad ayaan ugu faraxsanahay nabada aan hada haysto, laakiin marka laga tago nabada intanada badan waxaan ku suganahay isla xaaladii aan ku jiray markii ugu horaysay ee aan kasoo baxnay Bayaxow. Waxaan la noolahay jugtii maskaxeed ee igasoo gaadhay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow labadaba.' Waxaan leeyahay qaraw, fikir, iyo xusuuso ku saabsan waxyaabihii bahalnimada ahaa ee isoo maray. Xitaa waxay saamaysay awoodayda akhris, garasho, fikir iyo faham-gabi ahaanba maskax daydii way isbadashay.'

## Gabagabdii

Maanta, guryihii ay maxaabiistii hore ka dhiseen Bayaxow cidi ma dagana waxaana sidii u waardiyeeya ciidamada xooga gaarka ah ee Deegaanka Soomaalida. Goobta waxaa maamusha Wasaarada Maaraynta Musiibooyinka iyo Khataraha (DRMB), waxana u qorshaysan in ay guryaha dajiyaan dad seddex nooc ka kooban; dadka ay abaaruhu kasoo bara kiciyeen agagaarka Bayaxow ama gobolka shabeele, qoysas kasoo kala jeeda labo reer oo dega nawaaxiga Bayaxow, iyo koox kamid ah barakacayaasha Qoloji oo hayb la wadaaga qaabaa'ilada daga Bayaxow. Qaacidada dib u dajinta waxaa lagu saleeyey sidii looga faa'iidaysan lahaa guryaha isla markaana loo yarayn lahaaa suurtagalnimda isku dhacyo ka yimaada lahaanshaha guryaha.

Sida warbixintan lagu faahfaahiyey, kiiska maxaabiistii hore ee Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow wuxuu u baahan yahay in si qodo dheer loo tixgaliyo caafimaadka jidheed, maskaxeed, iyo dhaqan-dhaqqale ee saamaynaya noloshooda aas-aasiga ah si ay usii wataan halgan kooda nololeed. La xisaabtanka ay u baahan yihiin maxaabiistii soo badbaaday waa mid koobaysa walxaha magdhawga[15], xad gudubyadii oo aan soo noqonin iyo dambiilayaashii oo lala xisaabtamo. Magdhawga iyo xanaanada la xidhiidha dhaqaalaynta iyo adeeg siinta maxaabiistii hore waxaa ka mid ah laakiin ayna ku koobnayn lacago lasiiyo, u fududaynta adeegyada caafimaadka iyo ka gacan siinta cudurada maskaxda. Arintan waxaa kale oo kamid ah in la siiyo fursadaha lagu xoojiyo dhaqaalaha iyo waxbarashada sida deeqo waxbarasho, daymaha yaryar ee la bixiyo iyo hormarinta kale ee loo qorsheeyo kabitaanka. Talaabooyin kani waxay u sahli karaan dhibanayaasha kusoo laabashada doorkii ay lahaan jireen muqaal ahaan, dhaqaale ahaan, iyo maskax ahaanba ka hor intaan lagu xidhin Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow.



15. Si aad u dulmarto walxaha magdhawga, arag: https://syriaaccountability.org/wp-content/uploads/PILPG-Reparations-Memo-2013_EN.pdf

Dhaxalka Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow waa mid ku suntan xadhig bahalnimo ah oo muujinaya in dhibkii ugu badnaa loogu gaystay muwaadiniinta. Labada meeloodba waxay caan ku ahaayeen sharci darro iyo tixgalin la'aan nolosha bini aadamka. Xidhitaanka Jeel Ogaadeen, waa fursad muhiimad lagu siin karo wax barashada iyada oo lagu hormarin karo ogaanshaha iyo xusuusta wixii dhacay ee jiilasha mustaqbalka. Seddexdii sanno ee u dambaysay, maxaabiistii soo badbaaday waxay marar badan soo booqdeen Jeel Ogaadeen iyaga oo ay weheliyaan soo booqdayaal caalami ah. Balse sida ay hay'ada ASVS u ol'olaynaysay, waa in Jeel Ogaadeen laga dhigo madxaf caalami ah. Sidaas si lamid ah waa muhiim in xooga lasaaro barashada mawjadaha taariikheed ee Bayaxow kuwaas oo waxyar uun laga ogyahay.

Ugu dambayntii, muhiimadu ma aha kaliya in la baadi goobo caafimaadka mushtamaca soo badbaaday iyo xusuusta kuwii aynu ku waynay Jeel Ogaadeen iyo Bayaxow, balse waa in kor loosoo qaado nolosha kuwii kamid ka ahaa ee ay noloshoodu gabi ahaanba isbadashay ee baahida daran u qaba in la gacan qabto.

## Mahad celin

Warbixintan waxaa qoray Juweria Ali oo ay iska kaashadeen xubnaha Ururka Dhibanayaasha Deegaanka Soomaalida (ASVS).

ASVS waxay jeclaan lahayd inay u mahadnaqdo maal galiyeyaasha, dib u eegayaasha, turjumaannada, iyo dadka la wareystay ee bixiyay marqaatiyada muhiimka ah iyagoo nala wadaagaya waaya aragnimadooda; warbixintani ma suuroowdeen la'aantood.